Waaxda Dab damiska ee Seattle sfd CAM Qoraalka Taakuleynta Macaamilka 5966

Shattiyada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

Hanaanka Kormeerka Farsamaynta ee SFD ee Dhismayaasha Cusub iyo kuwa Dib loo Naqshadeeyay

Waxaa la cusbooneysiinta Oktoober 2020

Seattle Fire Department (Waaxda Dabka ee Seattle) ayaa kormeero samaysay si loo hubiyo in dhismayaasha dhismuhu ku socdo iyo kuwa dib loo naqshadaynaayo ay waafaqaan xeerka Dabka seattle.gov/fire/firecode. Kormeerayaasheena ayaa sidoo kale hubiya in nidaamyada badqabka ee ugu muhiimsan sida ganbaleelada dabka iyo agabka dab damiska ootomaatiga ah si sax ah loo naqshadeeyo ayna shaqaynayaan marka dhismaha dadka loo furo.

Goorma ayay tahay inaan codsado Kormeerka?

Dhamaan fattashaadda, shaqada waa in la dhamaystiro, horay loo baaro lana diyaariyo.

Haddii aad heshay waraaqda qorshaha dulmarka ee SFD kuusoo dirto, dhammaan waxyaabaha ku qoran waraaqda waa in la xaliyaa kahor intaadan dalban kormeerka. Marka kormeeruhu yimaado si uu kormeerka u sameeyo, waxaa lagaa doonayaa inaad haysato koobiga waraaqda qorshaha dib u eegista iyo qorshaha la ansixiyay oo lagu dhajiyay goobta shaqada.

Haddii mashruucaagu u baahnaa oggolaanshaha korontada ama farsamada oo ay bixiso Seattle Department of Construction and Inspections (SDCI, Waaxda Dhismaha iyo Kormeerka ee Seattle), ogolaanshahaaga waa inay saxiixdaa SDCI kahor intaadan dalban kormeerka.

Waxaa jira habab dheeraad ah oo lagu ogaado sida aad diyaar ugu tahay noocyada fattashaada.

Kormeerka Galbaleelka Dabka

Ka hor inta aan loo yeerin fattashaadda, Waaxda Handasada iyo Horumarinta (Department of Planning and Development) waa in ay saxiixdo SDCI nidaamkana waa in la soo bandhigaa. Tani waxaa ka mid ah dhamaan qalabka dheeraadka ah iyo kantaroolka digniinta dabka. Goobta waa in loo arko in ay gaarsiisan tahay "Nadaafadda Ugu Dambayso", sida, kumana eka, dhamaan katiifadaha, saqaafka, darbiyada iyo albaabada la geliyay si loo fulliyo tijaabinta digniinta maqalka.

Kormeerka Marwaxadaha Dabka Damiya iyo Agabka dabka caburiya/Nidaamyada Kale ee Dab daminta

Kahor intaadan codsan kormeer, qalabka ay difaacaan marwaxadaha dabka ama nidaamka dabka kahortaga waa in la dhigaa xarunta, la rakibaa ayna shaqaynayaan (gaaska iyo korontada). Waxaa intaas dheer, kahor intuusan kormeeruhu imaan, xaqiiji inaad kaar ku dhajiyo marwaxada adoo qeexaaya qalabka ay marwaxada dab damisku difaacayso, dhanka bidig ilaa midig, oo ku ag xir dab damis Heerka K ah marwaxada dabka damisa. Fadlan xaqiiji in qaanadaha AS -- Lagu dhisay iyo oggolaanshaha farsamada ee SDCI aad u haysato Nooca 1 ee marwaxadaha dabka hadday jiraan. Haddii nidaamka dabka kahortaga lagu waardiyeeyo nidaamka ganbaleelka dabka, Markaas waxaad u baahan doontaa farsamo yaqaano leh shahaadada galbaleelka dabka iyo shahaadada marwaxadaha dabka kahortaga ay joogaan xiliga kormeerka si loo tijaabiyo nidaamka dhawaan la rakibay.

Kormeerka Daboolka Dhulka Hoostiisa

Kahor intaadan daboolin tuubooyinka isku xiraaya biyaha daminta dabka ee dhismaha oo lagu xariirinaayo nidaamka biyaha ee magaalada, waa inaad heshaa kormeerka "daboolka dhulka hoostiisa" oo ay samayso SFD. Dhamaan biraha leysku xerxero, iwm. waa in ay dhamaystiran yahiin lana mariyo laami ama maado kale oo hakkisa mirirka la ogolaan karo. Waxaa dhici karto in la fulliyo fattashaadda blogyada inta uu socdo shubka ama kaddib. Waa in ay muuqdaan joogga iyo ballaca qaybtu si loo cabbiro. Sidoo kale arag Shaxda A ee Xeerka Maamulka v ee SFD si aad u hesho sharaxaad dheeraad ah: https://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/AdRule9.03.20.pdf

Kormeerka Nidaamka Biyo Mareenka ee Dhulka Hoostiisa

Tuubooyinka dhulka hoos mara iyo xariirada u dhaxeeya dhismaha iyo marinka biyaha magaalada ayaa lagu samayn karaa kormeerka daboolka, hase yeeshee, hoos u dhaca cadaadisku waa inuu ku jiraa heerarka la ogol yahay. Kormeerka qulqulka biyaha waa in la helo xoogga ka hor inta aan lagu xerin dhismaha ama Magaalada. Haddii la geliyay albaabka hubinta Magaalada, waa in la geliyo "surfiyada kariska." Sidoo kale arag Shaxda A ee Xeerka Maamulka v ee SFD si aad u hesho shuruudaha kormeerka oo dheeraad ah: https://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/AdRule9.03.20.pdf

Kormeerka Falaashka Dhulka Hoostiisa mara

Kormeerka waa in la fulliyo fattashaadda ka hor inta aan lagu xeranin siistemka dhismaha. Sidoo kale arag Shaxda A ee Xeerka Maamulka v ee SFD si aad u hesho shuruudaha kormeerka oo dheeraad ah: https://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/AdRule9.03.20.pdf

Kormeerka Nidaamka Biyaha Sayriya

Waa in aad wacdid fattashaadda daboolka ka hor inta aan la gelinin darbiga ama matoneelaha farageliya aragtida. Waqti kasta oo la baddalo ama la dhaqaajiyo madaxa waraabinta, waa in la sameeyo fattashaad.

Kormeerka Xaqiijinta Shaqada Nidaamyada Khadka Raadiyaha ee Gurmadka Degdega ah (BDA/DAS)

Si aad ugu diyaar garoowdo kormeerka SFD ee nidaamka BDA/DAS, fadlan dib u eegis ku samee xogtaan: https://www.seattle.gov/fire/business-services/systems-testing#bdadasemergencyradiocommunications. SFD waxay bixisaa xaqiijinta shaqada nidaamka oo qasab ah ayadoo adeegsanaysa raadiyasha badqabka ee dadwaynaha. Lagasoo bilaabo 1, 2021, waxaa qasab ah inaad sidoo kale gudbiso natiijooyinka tijaabinta shaqada una dirtaa SFD ugu yaraan 24 saacadood kahor intaan kormeerkaaga uusan samayn adeeg bixiye sadexaad www.thecomplianceengine.com.

Sidee ayaan ku Codsanayaa Kormeer?

Kormeerada Joogtada ah

Inta badan kormeerada waxaa la fuliyaa saacadaha caadiga ah ee shaqada. Ka codso kormeer oonleenka adoo booqanaaya webseetkeena kadibna buuxinaaya foomka qaabka oonleen ah: https://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/Request%20for%20Straight%20Time%20Eng%20Insp.pdf

Kormeerka Waqtiga Dheeraadka ah

Haddii aad doonayso in kormeer laguu sameeyo saacadaha aroorta hore, fiidkii ama maalmaha dhammaadka asbuuca, adeegso foomka codsiga kormeerka oonleenka ah kadibna dooro dookha saacadaha dheeraadka ah marka aad sheegayso saacadaha kormeerka aad codsanayso https://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/OvertimeInspectionForm.pdf. Waxaa lagaaga qaadayaa qarash dheeraad ah kormeerada saacadaha shaqada ka baxsan ayadoo lagu salaynaayo qarashka dhabta ah ee SFD uga baxa saacadaha waqtiga shaqada ka baxsan.

Waa maxay xogta aan U baahanahay Marka aad Codsanaayo Kormeerka?

Waxaan u baahan nahay xog ku saabsan cidda dhiibaysa qarashka (laga qaadaayo lacagta kormeerka haddii aan horay loogu bixin ogolaanshaha SDCI) iyo sidoo kale xog ku saabsan farsamo yaqaanka shahaadada ka haysta SDCI ee joogi doona inta kormeerku socdo. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad keento xog ku saabsan nooca kormeerka, cinwaanka, iyo tirada aaladaha la baaraayo.

Ilaa Muddo Intee Horaysa ayay Tahay inaad Codsado Kormeerkayga?

Waxaan caadiyan mudaynaa ku dhawad 6 maalmood oo kuwa shaqada kahor waqtiga caadiga ah ee kormeerada sabab la xariirta helitaanka kormeerayaasha. Kormeerada sacadaha shaqada ka baxsan ayaa hadda lagu mudeeyaa ku dhawaad laba maalmood kahor. Haddii aad raacdo nidaamyada lagu qeexay qoraalkaan taakulaynta macmiilka, wuxuu kaa caawinayaa inaad iska ilaaliso dib u dhacyo ku yimaada kormeerkaaga.

Ma loo baahan yahay in aan joogo marka uu yimaado kormeeruhu? Ma u baahanahay in aan goobta ku haysto Qorshayaasha la la soo ogolaaday?

Haa, waa in uu joogo wakiil awood u leh fullinta tijaabinta loo baahan yahay, awood u leh fududeynta meelaha la fattasho, iyo shahaado ka haysto Waaxda Dabka Seattle. Qofkaan waa in uu:

- qofka fattasha u soo bandhigo kaarka shahaadada si loo xaqiijiyo.
- haysto koobiga handasaha la soo ogolaaday.
- haysto koobiga warqadda fiirinta handasaha.

Sidee ayaan ula Hadli karaa Kormeerahayga?

Waxaad fariin u reebi karaa kormeeraha SFD adoo wacaaya (206) 386-1443. Dadka wax fattasha waa ka soo jawaabaan telefoonada loo diro marka ay ku sugan yahiin xafiiska.

Maxaan samaynayaa haddii qabo Su'aal La xariirta Xeerka marka Kormeeraha aan La heli Karin?

Waa la heli karaa Madaxa Qeybta Injineeriyada (Lieutenant of Engineering), ama Injeneerka Badbaadinta Dabka, maalinimada si looga jawaabo su'aalaha qaar ee la xariira Sharciga Dabka Seattle. Fadlan iimeel noogusoo dir seattle.gov/fire/email. Ogoow: Waa la ogol yahay inaad wacdo Farsamo Yaqaanada Dib u eegista Qorshaha si aad u waydiiso su'aalaha la xariira Xeerka Dabka, laakiin fadlan u sheeg dhibaatooyinka kormeerka Waaxda Farsamada.

Ma leygu soo Dallici doonaa Kormeerka injineeriyada lagu guul Dareystay ama laga Baaqday?

Khidmadaha fattashaadda dhismaha Waaxda Dabka Seattle waxaa ka mid ah fattashaadda lagu celceliyo oo aan lagu soo dallicin kharash haddii siistemka uusan gudbin fattashaadda kowaad. Hase ahatee, haddii la'aanta diyaarinta qandaraaslaha sabab u tahay fattashaadda lagu guul dareystay, Sharciga Dawladda Hoose ee Seaattle (Seattle Municipal Code) wuxuu Waaxda Dabka Seattle siiyaa awood ay ku soo ceshto kharashka waaxda uga baxay fattashaadaas. Sannadka 2020, khidmadda waa $273 halkii saac, marka lagu daro waqtiga fattasheyaasha geliyaan diyaarinta fattashaadda, safarka, iyo shaqada laga qabto goobta. Waxaa lagu dallici doonaa khidmad marka lagu guul dareysto fattashaadda la xariirto asbaabta soo socoto:

1. Dhamaan qalabka iyo shaqaalaha loo baahan yahay kana mid ah kuwa qaba shahaadada ku habboon oo aan joogin goobta muddo 20 daqiiqo gudahooda laga bilaabo waqtiga la ballaamay.
2. Marka aan la dhamaystirin tijaabinta-hore iyo/ama aan la heli karin warqadaha tijaabinta-hore ka hor inta aan la bilaabin fattashaadda lagu ballamay.
3. Ma jiraan qorshayaasha nidaamka dabka oo oo shaabadaysan/xirmo la ogolaaday (biyo firdhiyaasha, ganbaleelka, iwm.) oo xarunta yaala, haddii la heli karo.
4. Marka aan la awoodin in la bixiyo caddeynta saxiixa ruqsadda korantada SDCI, haddii lagu dabaqi karo.
5. Marka aan la haynin caddeynta SDCI xagga wiishashka (sumadda caddeynta ugu dambayso), haddii lagu dabaqi karo.
6. Marka la daboolo tubada waraabinta ka hor inta aan lagu sameynin fattashaad (kana mid ah darbiyaada iyo saqaafka).
7. Marka la daboolo leenka tubada waraabinta dhulka hoose ka hor inta aan la fattashin.

Sidee ayaan ku joojinayaa kormeerka? Ma jiraan Qarashaad Haddii Aanan Joojin Kormeerkayga Xili Ku haboon?

Si aad u joojiso kormeer balansanaa, iimeel noogusoo dir aad ciwaan uga dhigtay "Jooji Kormeerka" soona raaci taariikhda kormeerka, waqtiga, goobta, iyo noociisa. U dir iimeel isla ciwaanka aad u isticmaashay codsiga kormeerka: SFD_FMO_Engineering@seattle.gov kormeerada caadigga ah halka aad u dirayso SFD_FMO_OT_Inspections@seattle.gov kormeerada waqtiyada ka baxsan saacadaha shaqada

Waxaa lagaa qaadi doonaa qarash haddii kormeerka la joojiyo adoon ogaysiis ku filan soo dirin. Qarashaadka iyo jadwalada ayaa ah sida soo socota:

- *Kormeerada Caadiga ah* Soo dir ogaysiiska joojinta kahor ugu yaraan 24 saacadood si aad uga fogaato lacagta joojinta oo dhan $273.
- *Kormeerada Waqtiga Dheeraadka ah* Jooji marka la gaaro 9 a.m, maalinta ganacsiga kahor kormeerka si aad uga fogaato qarashka joojinta lalasoo daahay ee ku baxaaya qarashaadka shaqaalaha ee ay magaaladu gashay.

Maxaan Samaynayaa haddii aan Fahmin Sixitaanka loo baahan yahay?

Waxaad si toos ah ula xariiri kartaaa fattashaha laguu xil saaray ama waxaad kala xariiri kartaa (206) 386-1443 si aad u heshid sharaaxaad kasta ama caddeyn kasta oo loo baahan karo.

Goormaan Daggi Karaa ama Isticmaali karaa Dhismahayga?

Dagista iyo isticmaalka dhismaha waxaa kaliya la ogol yahay kadib marka SDCI ay oggolaato taasoo qaadanaysa

Foomka Shahaadada Ogolaanshaha Dagista, waa xad gudub inaad dhismaha degto kahor intaadan qaadan ogolaanshahaan.

Mararka qaar shahaadada dagista oo ku meel gaar ah ayaa laguu ansixin karaa kahor intaan lasoo saarin Shahaadada Dagista ee rasmiga ah - fadlan booqo https://www.seattle.gov/fire/business-services/construction-inspections si aad u hesho xog ku aadan shahaadooyinka ku meel garka ah ee dagista. Shaqsiyaadka aan ahay*n shaqaalaha dhismaha* ayaa loo ogol yahay inay galaan dhismaha kahor intaadan helin Shahaadada Fasaxa Dagista ee ku meel gaarka ah marka uu fasaxo Qandaraaslaha Guud. Qandaraaslaha guud ayaa masuul ka ah bixinta tababarka badqabka oo la siinaayo dadka loo ogolaaday iyo in la xaqiijiyo inay si sax ah ugu qalabaysan yihiin qalabka difaaca shaqsiga ee loogu baahan yahay xarunta dhismaha ayna dajiyeen Xeerarka Shaqaalaha iyo Ganacsiga ee Gobalka Washington, shaqsiyaadka indho-noocaas ah indhaynaaya dhismaha ayaa laga doonayaa inuu la socdo Qandaraaslaha Guud ama wakiilkiisa.

*Dadka u diyaarinaaya dhismaha dagista*uma baahna in dhismaha loo raaco marka uu ogolaado Qandaraaslaha Guud. Dhismayaasha qasabka ay tahay in lagu xiro agabka dabka dabiya, xaraynta ama aruurinta agabka dabku qabsan karo ee aan la xariirin dhismaha ayaa mamnuuc ka ah dhismaha ilaa nidaamka dab damiska la ansixiyo.

Sidoo kale ka fiiri xog ku aadan Shahaadooyinka Ku meel Gaarka ah ee Gelitaanka dhismaha halkaa: https://www.seattle.gov/fire/business-services/construction-inspections

Goorma ayaan codsan karaa Ansixinta Shahaadada Gelitaanka Dhismahayga?

Marka siistemyada badbaadinta dabka la ogolaado lana fattasho lana dhamaystiro jidadka ka bixidda.

Maxay yahiin khidmadaha aan ku bixinaayo Kormeerka?

Fadlan arag xogta qarashka ee lagu sheegay webseetkeena: http://www.seattle.gov/fire/inspections.

Haddii aan la xariiro Shirkad dhisme si ay dhismaha u dhisto Yaa masuul ka ah Wicitaanka Kormeerada iyo Ansixinta Gelitaanka Kama Danbaysta ah?

Milkiilaha sharciga ayaa mas'uul ka ah in uu waco fattashaadda iyo ogolaashada. Haddii aad dooneysid in dhisahaaada qaato mas'uuliyadaan, tani waa in lagu caddeeyo heshiiska. Hubso ruqsadaada iyo hubso in la bixiyay ogolaashada kama dambaysta ee la hubo si loo daggo, ka hor inta aadan u guurin dhismaha. Caadi ahaan, shirkadda gelinta ayaa qabata ballanka fattashaadda gelintooda.

Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan sharuudaha adeegyada Guriga ee Dadweynaha Seattle (SPU)?

Si loo ballamiyo fattashaadda SPU xagga daaboolka dhulka hoose ama qalabka biyaha gadaal ka baxa ka baxa, wac (206) 684-5803, laga bilaabo 8:00 ilaa 9:00 a.m., ama 9:00 a.m. kaddib, wac (206) 684-3333.

SPU waxay u baahan tahay fattashaadda tubada adeegga biyaha loo isticmaalo badbaadinta dabka iyo biyaha xaafadda. Fadlan raac lifaaqyadaan si aad u hesho xog dheeraad ah oo kasoo bixiyay SPU kuna saabsan tuubooyinka dhulka hoostiisa, shuruudaha qulqulka biyaha, iyo xariirada isdhaafka ah. https://www.seattle.gov/utilities/construction-resources/water

Waxaad sidoo kale ka fiirin kartaa qaybaha xeerarka iyo axdiyada soo socda:

Xeerka Dawlada Hoose ee Magaalada Seattle (Isku xirka Isdhaafka ah): SMC 21.04.070 Cross-Connections: https://library.municode.com/wa/seattle/codes/municipal_code?nodeId=TIT21UT_SUBTITLE_IWA_CH21.04WARARE_21.04.070CRNN

Xeerka Maamulka ee Washington (Isku xirka Isdhaafka ah): WAC 246-290-490: http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=246-290-490

ISKA BARI YEELIDA MASUULIYADA SHARCIGA: *Foomkaan Macluumaadka Caawimaada Macmiilka (CAM) looma adeegsan karo inuu badal u noqdo xeerarka iyo qaanuunada. Shakhsiyaadka waxay mas'uul ka yahiin u hoggaansamida dhamaan sharuudaha xeerka iyo sharciyada, haddii lagu sharaxay CAM ama haddii aan lagu sharaxin.*